



Australian Government



ParentsNext

Participation Plan (Qorshaha ka Qaybgalka)

Waan ogolahay balamada iyo nashaadka lagu sharxay qorshahan inay iga caawin doonaan fulinta ujeedooyinkayga shaqo ee mustaqbalka.

Waan fahmay in Participation Plan kayga uu ku jiro waxqabad khasab ah oo ah inaan sameeyo iyo balamo Khasab ah oo ay waajib tahay in aan tago waxayna ka bilaabaneysaa maalintaan saxiixo.

Waxaan ka warqabaa in haddii aanan iman karin balan, ama wax qabad, waa in aan la xiriiraa bixiyahayga ParentsNext balanta ka hora ma waxqabadka la qorsheeyey inuu dhaco. Waxaan fahamsanahay in haddii aanan raacin waxqabadka khasabka ah iyo tegida balamaha khasabka ah, waxaa laga yaabaa in lacag bixintayda taageerada in la hakin doono.

Waxaan faham sanahay inaan codsan karo in Participation Plan kayga dib loo eego wakhti kasta si uu u muujiyo wixii is bedel kasta ah ee noloshayda ku saabsan.

Dhammaan jawaabaha waa in lagu bixiyaa Ingiriis.

Magac:

JSID:

CRN:

Ujeedo (oyinka) - kuwani waa ujeedooyinkayga shaqo.

Waxqabadyada iyo Balamaha - waxqabadyada iyo balamaha ku jira qorshahan waxay iga caawin doonaan inaan gaaro ujeed-kayga/ooyinkayga

Magac:	Faahfaahinta Bixiyaha: ParentsNext:
Saxiix:	Saxiix:
Taariikh:	Taariikh:

Macluumaadka aad u baahan tahay inaad ogaatid

Wax ku saabsan Participation Plan kaaga

Sida waafaqsan Sharciga Damaanada Bulshada, waalidiinta looga baahan yahay inay ka qaybgalaan ParentsNext guud ahaan waxaa looga baahan yahay inay galaan Participation Plan si uu uga caawiyo qorsheynta iyo isu diyaarinta shaqo. Participation Plan kan waxaa weeye Employment Pathway Plan (Qorshaha Marinka Shaqo) ee ujeedooyinka *Social Security Act 1991* (*Xeerka Damaanada Bulshada ee 1991*).

Participation Plan kagu waxaa loogu talagalay baahidaada shakhsiyeed waxaana ku jira wax qabadyo iyo balamo aad ogolaatay inaad sameyso si aad u fuliso waajibaadka lagaaga baahan yahay ee labada dhinac ah. Wuxuu sidoo kale qorayaa waxyaalaha aad ogolaatay inaad sameyso si aad u gaartid ujeedooyinkaaga shaqo ee mustaqbalka.

Participation Plan kagu wuxuu bilaabanayaa maalintaad saxiixdo ama aad u aqbasho electaroonik ahaan.

Maxaan sameeyaa haddii aanan sameyn karin waxyaalihii aan ogolaaday?

Haddii aadan balan iman karin ama ka qaybgeli karin waxqabad sababtii waxay doonto ha ahaatee, waa inaad wargelisaa adeeg bixiyahaaga (ama Services Australia, haddii aadan haysan adeeg bixiye). Waa inaad tan sameysaa balanta ama waxqabadka ka hor. Haddii aadan wargelin, oo aad ku guul dareysato tegida balan ama waxqabad, lacagtaada ka taageerida dakhliga waa la hakinayaa waxaana laga yaabaa inaad lumiso dhibco.

Sidoo kale, haddii aad u dhaqanto si aan habooneyn balanta ama waxqabadka, ama aadan fulin waxa kale ee lagaa doonayo, lacagtaada taageerada dhakhliga waa la hakinayaa waxaana laga yaabaa inaad dhibco lumiso.

Haddii aad sii wado in aadan fulin waxyaalaha lagaa doonayo, waxaad la yeelan doontaa wareysi adeeg bixiyahaaga (ka dib markaad lumiso saddex dhibcood lix bilood gudahood) ama qiimeyn la yeelato Services Australia (ka dib markaad shan dhibcood lumisid lix bilood gudahood) si aad uga hadashid waxa lagaaga baahan yahay iyo sababtaadan u fulinaynin.

Haddii aysan jirin sabab wanaagsan oo aadan u filineynin waxa lagaaga baahan yahay, oo aad sii wado fulin la'aanta waxa lagaaga baahan yahay, waxaa laga yaabaa in lacagta taageerada dakhtligaaga la yareeyo ama la joojiyo. Haddii lacagtaada la joojiyana, afar toddobaad lacag laguma siin doono waana inaad dib u soo codsataa lacagtaada.

Haddii ay jiraan sababo macquulla oo aadan u iman karin balamahaaga, uguna qabygeli karin waxqabadyada ama aadan u fulin waxyaalaha kale ee lagaaga doonayo Participation Plan kaaga, waa inaad tan kala hadashaa adeeg bixiyahaaga (ama Services Australia, haddii aadan haysan adeeg bixiye).

Maxaa dhacaya haddii aad hesho shaqo lacag la bixinayo?

Waa inaad u sheegtaa Services Australia wixii ku saabsan dakhli kasta ee adiga ama saygaagu aad ka heshaan shaqo, isla labada toddobaad ee aad shaqeysay. Tani waxay ka caawineysaa Services Australia inay hubiyaan in lagu siiyo lacagta saxda ah ee taageerada dakhliga. Tani waa muhiim sababtoo ah, haddii lacag ka badan intii aad lahayd lagu siiyo, waxaa laga yaabaa inaad lacagtaas dib ugu soo celiso Services Australia.

Haddii aan diido go'aanka la gaaray maxaa dhacaya?

Haddii aad diido go'aanka Services Australia ee saameynaya lacagtaada ama go'aanka Services Australia ay ka qaadatay Participation Plan kaaga, ama haddii aad saluugsan tahay adeega aad heshay, kala xiriir khadka natiijo celinta Services Australia iyo cabashooyinka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah 1800 132 468.

Haddii aad diido go'aanka adeeg bixiyaha ParentsNext uu ka qaatay Participation Plan kaaga, ama aad saluugsan tahay wax ku saabsan adeegaad heshay, waxaad kala hadli kartaa waxaad saluugsan tahay adeeg bixiyahaaga ama kala xiriir Department of Employment, Skills, Small and Family Business National Customer Service Line ee 1800 805 260, oo baari doona waxyaalahaad saluugsan tahay.

Haddii aadan ku qancin jawaabtaad heshay, waxaa laga yaabaa inaad arinta hore u sii wado adoo kala xiriiraya Commonwealth Ombudsman 1300 362 072.

Arimaha gaarka ah

Macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaa ilaaliyey sharciga, oo ku jiro *Privacy Act 1988* (*Xeerka Arimaha gaarka ah ee 1988*). Waxaa la ururin karaa oo kaliya, la isticmaali kartaa ama la bixin karaa meeshii aad ogolaansho bixisid adigu, ama meeshii sharcigu ogol yahay.

Waxaan ku siiney macluumaad gaar ah oo muhiim ah oo ku saabsan ururinta, isticmaalka iyo bixinta macluumaadkaaga shakhsiyeed. Macluumaad intaas ka badan waxaa laga helayaa:

- www.employment.gov.au/privacy
- bixiyahaaga
- Services Australia
- Office of the Australian Information Commissioner ee www.oaic.gov.au

Waa muhiim inaad hubisid inaad akhrisid oo aad fahamtid macluumaadkan.